

كيف نستقبل  
رمضان في  
عشر خطوات

Toban qodob oo ku  
saabsan sida looga  
diyaar garoobo  
Ramadanta

ماجد محمد إقبال بهوتا



رمضان  
مبارك





بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

Mahad oo dhan waxa u sugnaatay allah inagu galaday inuu ina gadhsiyo bisha Ramadan, dushena ku shubay in badan oo dherada iyo darajo ah. Isaga Ayaan umahad celinaynaa mahadnaq ucuntama waynidisa iyo awodisa iyo waynashaha fadligisa iyo galadiisa ee uu ina siiyay. Waxan qiraya inanu jirin allah xaq lagu Cabuda allah mooye, allah oo ku galadaystay umadda islaamka soonka bisha ramadan iyo u istaagida cibaadiisa.

Sido kale waxaan qirayaa inuu yahay nebi Mohamed adoonkisa iyo rasuulku uu soo diray, ee ahaa midka ugu khayrka badan ee sooma salaadana ee adeeca allah raxmaanka ah.

Rasuulku waxa uu ahaa mid ugu bishareey saxaabada ramadaanta Waxa uu odhan jiray ( **اللَّهُمَّ أَهْلَهُ عَلَيْنَا بِالْأَمْنِ وَالْإِيمَانِ** , **وَالسَّلَامَةِ وَالْإِسْلَامِ**)

{Oo micnihedu tahay {yaa allah bishan noogu so bixi(bili) amni iyo iiman nabad galyo iyo islaamnimo}

Amaanah allah iyo nabadgalyadiisu dushiisa ha ahaato isaga iyo ehelkiisa iyo asxabtisa iyo cidi racday ee wanaag ku racday ilayo malinta laysaso saarayo.

**Inta dabadeed:** hada waxaynu soo gadhnay dhamadka bisha shacbaan, kaliya waxa inoga dhiman Ayamo si aynu uqabilno bilaha bishii ugu khayrka Badnayd guud ahaan, bishani waa bil xasusashadedu ay dhaqajinayso nafta iyo darenka quruxda badan oo ina xasusinaysa soonka iyo inaynu U istagno cibadada, iyo in qoorahena laga xoreyo naar iyo inaynu khilaafno xumanta ay ina farayso nafteenu side ayay u ahayn bishan sidaas!,iyadoo oo ah bil uu dhawaaqayo dhawaaq isaga oo odhanay ;

( **يَا بَاغِي الْحَيْثِيرِ أَقْبِلْ وَيَا بَاغِي النَّوْءِ أَقْصِرْ ، وَلِلَّهِ عُتَقَاءُ مِنَ النَّارِ وَذَلِكَ كُلُّ لَيْلَةٍ** ) micnahedu tahay

}Midka khayrka Doonayooow soo qaabil midka sharka doonyoowna Ka joogso. Allah waxaa u sugnaaday kuwa uu naarta ka xoreeyaa, taasina waa habeen kasta oo mid ah bishan}

Waa bil uu ALLAH ku Amray inay soman dadka Ilaahay rumeyey ee muslimka ah ( **يَتَأْتِيهَا الَّذِينَ ءَامَنُوا كَتَبَ عَلَيْكُمُ الصِّيَامُ كَمَا كَتَبَ عَلَى الَّذِينَ** ) **(من قَبْلِكُمْ لَعَلَّكُمْ تَتَّقُونَ**

(Oo micnaheedu yahay (hooy kuwii rumeyayoow wixii rumeeya l ayidhi, waxa la idinku waajibay soonka sidii logu waajib yeelay kuwii idinka horeyay si aad allah uga boqdaan)

Waa bil barakaysnayn oo uu qur'anku soo dagay ( **شَهْرُ رَمَضَانَ** ) **(الَّذِينَ أَنْزَلَ فِيهِ الْقُرْآنَ هُدًى لِّلنَّاسِ وَبَيِّنَاتٍ مِّنَ الْهُدَى وَالْفُرْقَانِ**

(Oo micnaheedu yahay ( Sooma bisha ramaadan ee allah soo dajiyay dhexdeeda qur'aanka isag oo u ah qur'aanku dadka hanuun iyo cadaymo hanoonka xagisa iyo kala saar uu kala saarayo xaqa iyo baadilka)

Waxay ahayen dadki wanagsana ee saxabada iyo kuwi racay dariqadoodi kuwo muhimad siya kuna farxa bisha ramadan imashaheda.

waxay ahayen kuwo ilaahay barya inuu gaadhsiyo bisha Ramadan. sido kalena uu ka aqbaloo

waxayna ahayen kuwa jecel habenadeeda inay Ukacan iyo inay quranka akhriyan. waxayna ahaayeen kuwo ka war hay dadka masakiinta ah si ay sadaqo usiiyan iyo inay cunto siyan, sido kale ay afuriyan midka sooman. waxayna ahayen kuwa ladagalama nafahooda si ay ilaahay u adeecaan.

Waxay ahayen kuwa sooma maalmihisa ilaaliyana soomkooda kana ilaaliya wixii ka jabinaya iyo wixii dhimaya ajarkiisa ee beena iyo ciyaar iyo xan iyo isku dirka iyo beenta.

Waayo waxay ogayen abalmarinata qofka sooma soonkisa iyo ajarkisu inta uu le'eg yahay ilahay agtisa sidu inoo sheegay

قَالَ اللَّهُ: كُلِّ عَمَلٍ ابْنِ ) nabigu scw xadiis uu ka warinyo nabigu allah ( **أَدَمَ لَهُ، إِلَّا الصِّيَامَ، فَإِنَّهُ لِي وَأَنَا أَجْزِي بِهِ، وَالصِّيَامُ جُنَّةٌ، وَإِذَا كَانَ يَوْمَ صَوْمِ أَحَدِكُمْ فَلَا يَزُفُّ وَلَا يَصْحَبُ، فَإِنْ سَابَهُ أَحَدٌ أَوْ قَاتَلَهُ، فَلْيُقِلْ إِنِّي أَمْرٌ صَائِمٌ وَالَّذِي نَفْسُ مُحَمَّدٍ بِيَدِهِ، لَخُلُوفُ فَمِ الصَّائِمِ أَطْيَبُ عِنْدَ اللَّهِ مِنْ رِيحِ الْمِسْكِ، لِلصَّائِمِ فَرْحَتَانِ يَفْرَحُهُمَا: إِذَا أَفْطَرَ فَرِحَ، وَإِذَا لَقِيَ رَبَّهُ فَرِحَ بِصَوْمِهِ** )

Oo micnihiisu yahay ( allah aya yidhi;camal kasta waxa iska leh ajarkiisa adoonka soonka maahen,soonka aniga ayaa leh aniga ayaaana ka abaal marinay,soonku waa gaashaan,marka uu ahaado midkiin mid sooman yahay maalinkaa yaanu hadal xun ku hadlin yaanu buuqina,haddii uu caayo qof ama la dagalamo haku yidhaah"waar anu qof sooman Ayaan ahay". Allah nabbi muxmamed naftiisa gacantiisa ku jirtaan ku dhaartee urta kasoo baxda afka qofka sooman waxay ka udgoontahay allah agtiisa urta cadarka miskiga. Qofka sooman waxa uu leeyahay labo farxadood oo uu ku farxo labadoodaba,marka uu afurayo iyo marka uu allah kula kulmayo soonkiisa).

Soonku waa teed (dahaadh) asturaya qofka sooman si uuna uraacin hawadisa iyo xumanta naftu ay farayso taaso ku ridaysa danbi uu naar ku mutayasato ilaahay ayeynu kamagan galnee.

Ilaahay waxan ku waydisanayna inuu ina gadhsiyo ramadan iyo inaad naga yeesho kuwi ka faa,idaysta oo laga aqbaloo waanogada iyo inad na waafajiso inaan Samayno camalo wanaagsan iyo inaan ka tagno wixi danbiya Aamiin)

**Hadaba sidaynu uqaabilna ramadaan :** Bal kawaran hadaad ogato inuu kuu imanayo qof kugu qaali ah ama kusoo booqanayo ayaamo ka dib maxad dareemi lahaye?

Siduu noqon lahaa dareenkaga ama xiisahagu si aad uqaabishid martida?

Bal kawaran haddaba haddaynu odhano martidaasi waa bishii ramadaan sided uqabili lahaye? Haddaba inta aynaan ka hadal sidaynu uqaabilna ramadaan waxan jeclaystay inaan idin xasuusiyo inaad horta ka yeshid camalkaaga oo dhan mid aad ugu dhawaanaysid ilaahay hadii kale waxba ha is daalin waayo lama aqbaloo camal aanad ilaahay darti usamaynayn sidu ilaahay ku sheegay qurankisa ( **وَمَا أُمِرُوا إِلَّا لِيَعْبُدُوا اللَّهَ مُخْلِصِينَ لَهُ الدِّينَ** ) **(خُتَفَاءً**

Dadkana waxaan Eebe caabudiddiisa ahayn lama farin iyagoo u kali yeeli Eebe Diinte, toosanna,.

Hadaba waxan kugu la talinaya inaad raacdo tobanka talaabo:

(1) **alle bari duco:** Qofkasta oo muslim ahi waxa u haboon inuu ilaahay baryo inuu gadhsiyo bisha ramadaan iyado aynu kaga dayanayno dadki wanagsana asxabti siday samayn jiren iyo inuu allah wafajiyo soonka iyo in uu cibadada u istaagno.

(2) **Soonka:** Inuu badiyo qofku soonka bisha shacbaan sida maalmaha isniinta iyo khamiita iyo maalmaha caddada(13 14 15)bisha shacbaan iyo maalmaha kale ee uu awoodo. Sida lagaso wariyey asxaabigi Usaama binu sayd( **عن اسامة بن زيد انه قال: قلت: يا رسول الله لم اراك تصوم شهرا من الشهور ما تصوم الشعبان، قال: ذاك شهر يغفل الناس عنه بين رجب ورمضان وهو شهر ترفع فيه الاعمال الي رب العالمين فاحب ان يرفع عملي وأنا صائم** )

(Xadiskan waxa uu usame waydiiyay nabig scw wax u ku yidhi rasuulki allaw ku aan arag adoo soomaya bilaha sida aad usoonto bisha shacbaan rasuulku scw waxa uu yidhi "taasi waa bil dadku ay moogan yihiin una dhaxaysa rajab iyo ramadaan waan bil camalada kor loo qaado xaga allah ana waxaan jeclaystay in camalkayag la qaado anoo sooman).



Sidoo kale waxa ay caa'isha warisay allah ka raali noqdee( كَانَ

رَسُولَ اللَّهِ ﷺ يَصُومُ حَتَّى تَقُولَ: لَا يُفْطِرُ، وَيُفْطِرُ حَتَّى تَقُولَ: لَا يَصُومُ، فَمَا رَأَيْتَ رَسُولَ اللَّهِ ﷺ اسْتَكْمَلَ صِيَامَ شَهْرِ إِلَّا رَمَضَانَ، وَمَا رَأَيْتُهُ أَكْثَرَ صِيَامًا مِنْهُ فِي شَعْبَانَ)

(Wax ay tiri caa'isha rasuulka Allah waxa uu ahaa mid sooma ila aan ka odhanayno ma afuraya. wuuna afuri jiray ila aan ka odhanayno ma soomayo. maan arag rasuulka oo bil dhammaanteed soomay ramadaan marka laga reebo ,maan arag mid ka soon badan sida uu usoomo shacbaan.)

(3) **qur'aan akhriska**: Markii ay bisha shacbaan noqotay mid hor dhac oo kale u ah bisha ramadaan waxa lagam maarmaan inaan akhrino wax ka mid ah qu'aanka si aynu u noqono kuwo u diyaar garaysan akhrinta qur'aanka bisha ramadaan sida uu yidhi maslama ibnu sahal(شَهْرُ شَعْبَانَ شَهْرُ الْقُرْآنِ)

Bisha ramadaan waa bishii qur aan ruuga yacni qur aank ayay aad u akhrin jireeen.

Wax uu ahaa xabiib ibnu abii taabit mark ay soo gasho shacbaan mid yidhaah (هَذَا شَهْرُ الْقُرْآنِ) Bishani waa bishii quran ruuga.

Waxa u ahaa qays ibnu al malaa;ii marka ay shacbaan soo gasho, mid kasoo taga hawlihiisa qur'aankana uso jeesta oo qaanila.

(4) **ka fogaanshaha caajiska**: Bisha ramadaan maahan bil ciyaar iyo hurdo iyo caajis mana ahan bil musalsalada la daawada sida ay dad badan moodayaan, hase yeeshee waa bil lagu dadaalo cibaadad allah iyo camalka.

Ka digtoonow inaad wakhtiga ku lumiso khaasare wakhtigaga iyo wax aan raali galinyn allah.

Waxa haboon inaad ku qaabisho bashan go'aan run ah, cusboonaysii balanta allah tawbad run ah dhamaan danbiyadii kaa dhacay una dadaal sidii aad naftaada u wanaajin lahayd xasusnoow hadalkii allah

(يَوْمَ لَا يَنْفَعُ مَالٌ وَلَا بَنُونَ إِلَّا مَنْ آتَى اللَّهَ بِقَلْبٍ سَلِيمٍ) maalin xasusnoow ayna anfacayn qofka maal iyo caruur qof allah qalbi nadiif ah la yimaad maahane

(5) **Ramadaanta in lagu qaabilo farxad iyo rayn rayn**: waxaa haboon qofka muslimka ah inuu inuu ku qabilo bisha ramadaan farxad iyo rayn rayn. iyo in uu xasusnaado in allah udoortay bishan waajibyeelida uu waajib yeelay soonka iyo sharciyaytiisa iyo in uu allah soo dajiyay qur'aanka isago oo Hanuun u ah dadka iyo inuu dadka kasaaro muqadiga oo uu usaaro nuurka iyo iftiinka.

Side ayaynu ugu farxayn iyada oo ay tahay bil la furo albaabada jannada lana xidho albabada naarta.lana xidhxidho shayaadiinta. Lana laban laabo ajarka iyo wanaaga aad samayso. Korna loogu qaado darajooyinka qofka .loona dhaafo dunuubta yaryar.

(6) **In lag fogaado munkarka(Xumaanta)** : waxa inagu waajib ah in aanu ku qaabilno bishan ramadaan ee barakaysan go,aan

qaadasho run ah soonkeeda iyo cibadad u istaagideeda inaga oo rumaysan ajarna dalbayna.iyo in ay ka soonto xubnaheenu danbiyada sida; hadalka xaaraanta ah, iyo eegmada xaaraanta ah, iyo dhagysiga heesaha, iyo cunida wax xaaraamta ah iyo cabidiisa, si aynu ugu guulaysano danbi dhaafka iyo naarta oo la inag xoreeyo rasuulka waxa uu yidhi **مَنْ صَامَ رَمَضَانَ إِيمَانًا وَاحْتِسَابًا**

(غُفِرَ لَهُ مَا تَقَدَّمَ مِنْ ذَنْبِهِ)

Qofkii sooma ramdaanta iska oo rumaysan yabooh allah ajar dalabna usoom waxaa loodhaafa danbigaa soo horu maray)

Waxa Inoo haboon in aanu ilaalino aadaabta soonka oo ah suxuurta in dib dhigno ilaa habeenka aakhirkiisa, afurka oon horay usoo dhigno, marka aynu habsano in ay cadceedu dhacday, in aynu badsano camalda wanaagsan.

(7) **In aanu iska bari yeelno wixii soon waajib ah ee la inagu leyahay**: Qofka ay dushiisa ahaatay qalle ramadaantii hore ha u dagdago si uu u qalleeyo soonka inta aany bishan shacbaan bixin,waxa ay tiri caa,isha allah ha ka raali ahaade (كَانَ يَكُونُ عَلَيَّ)

(الصَّوْمُ مِنْ رَمَضَانَ، فَمَا اسْتَطِيعَ أَنْ أَقْضِيَهُ إِلَّا فِي شَعْبَانَ)

(Waxa ahaan jiray dushayday soon bishi Ramadan maad awoodi jirin inaan qalleeyo ilaa bisha shacbaan dhexdeed ma ahane )

(8) **barashada masalooyinka bisha ramadaan khusaysa** : Waxa waajib ku ah qofka muslinka ah in uu allah ku caabudo cilmi isag oo ku sugan,sidaa darteed waxaa haboon in uu qofku akhriyo wax ka mid ah axkaamta khusaysa ramadaanta sida; waxyaabah soonka jabiya, waxyaabah la jecel yahay in la sameeyo( sunyaasha) bisha dhexdeeda sida in habeenkii salad la tukado, ehelka oo la xidhiidhiyo, in masaaajidka lagu nagaado iyo wixii la mid ah.

(9) **carabka in laqabadiiyo carabka allah xuskiisa** : Ogow allah ku naxariistee carabku haddi uu la qabsado shey kama tago, carabkaag bar ku celceli inaad allah waydiisato danbi dhaaf allah akbar subxaa allah, inaad nabiga ku sallido. Xasusnawna in dikriga allah qalbiga xasilooni iyo daganan siinayo sida u allah yidhi (الَّذِينَ آمَنُوا وَتَطْمَئِنُّ قُلُوبُهُمْ بِذِكْرِ اللَّهِ أَلَا بِذِكْرِ اللَّهِ تَطْمَئِنُّ الْقُلُوبُ)

) Waa kuwii iimaanka laga helay ee quluubtoodu kuxasisho dikriga allah, dikriga allah ayay quluubku ku xasisha dagtaa)

(10) **Qorshayn** : Qorshee cida agtaada joogta asxaabtaada ah inaad camalo iyo mashaariicyo aad samaysaan bisha ramadaan sida in aad dadka afursiisaan inaad afurka ku qaybisaan wadooyinka, inaad dadka xanuuunsan buuqataan, inaad qur'aan wada dhamasyaan iyo wiixi la mid ah.

(Ugu danbayn waxan allah waydiisanay inuu inaga yeelo kuwo radaan u istaaga cibaado iyagoo rumaysan ajar dalbanaya iyo in uu allah ina gaadhsiiyo habeenka laylatul qadarka.. Aamiin )

Waxaa diyaariyay qoraalka:

Maajid maxamed iqbaal bhutta

(Allah u danbi dhaafo isag iyo waalidiintiisa iyo sheekhdiisaba)

Waxaa tarjuntay qoraalkan

warda yuusuf

